Su'aalaha badanaa la isweydiiyo
Warbixinta ardayga ee shakhsiga ah

NAPLAN

2021

NAPLAN waa qiimeyn qaran oo akhris, qorista iyo xisaabta oo ay u fadhiistaan ardayda Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad May sannad kasta. Xirfadaha akhris, qorista iyo xisaabta ayaa aasaas u ah dhammaan barashada. NAPLAN waa qiimeynta kaliya ee qaran ee ay u fadhiisan karaan dhamaan caruurta Australiya. Su'aalaha waxay qiimeeyaan waxyaabaha ku xidhan Manhajka Australiya: Ingiliishta iyo Xisaabta.

Natiijooyinka NAPLAN waxay u oggolaaneyaan waalidiinta / daryeelayaasha iyo barayaasha inay arkaan sida ardaydu ugu socdaan horumarka akhriska, qoraalka iyo xisaabta waqti ka dib - shakhsi ahaan, iyadoo qayb ka ah bulshada dugsigooda, lana barbardhigayo heerarka qaranka.

Imtixaanada NAPLAN waa hal dhinac oo ka mid ah qiimaynta iyo nidaamka warbixin ee dugsi kasta, mana beddeleyso qiimeynta ballaadhan, ee socota ee ay wadaan macallimiintu ee ku saabsan heerka arday kasta. Macallinka ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa aragtida ugu fiican ee horumarka waxbarasho ee ilmahaaga. Iyada oo ay la socdaan warbixinnada kale ee qiimeynta dugsiga, warbixinnada NAPLAN waxaa loo isticmaali karaa in loogala hadlo macallimiintooda meelaha u uku wanaagsan yahay iyo meelaha uu horumarka ka sameynayo.

Goorma ayaan helayaa Reboodhka NAPLAN ee ilmahayga maxayse ii sheegi doontaa?

Haddii aad tahay waalid / daryeele arday ka qayb qaatay Imtixaanada NAPLAN ee bisha May ee sannadkan, dugsiga ilmahaaga ayaa ku siin doona warbixin shaqsiyeed ee natiijooyinka ilmahaaga.

Waxaad filan kartaa inaad heshid warbixinta NAPLAN ee ilmahaaga laga bilaabo Ogos wixii ka dambeeya, marka maamulka imtixaanka ee qobolka iyo teritorigu (www.nap.edu.au/taa) ay siiyaan reboodhka natiijada ardayda NAPLAN iskuullada.

Waxaad arki doontaa shan miisaanka heerarka la hanankaro (ama 'gantaalada maraakiibta') oo muujinaya natiijooyinka NAPLAN ee cilmahaaga xagga akhrinta, qorista, higgaadinta, naxwaha & hakadka, iyo xisaabta.

Natiijooyinka qiimeynta akhris, qorista iyo xisaabta ee Sannadaha 3, 5, 7 iyo 9 waxaa lagu reboodhgareeyaa miisaan laga qaaday Kooxda 1aad (Band 1) ilaa Kooxda 10 (Band 10). Qiyaastaani waxay u taagan tahay heerarka sii kordhaya ee aqoonta, fahamka iyo xirfadaha lagu muujiyay qiimeynta.

Sidee NAPLAN loogu gudbiyaa iskuullada?

NAPLAN waxay ku socotaa khadka onlaynka ah, iyada oo ujeeddadu tahay in dhamaan iskuulada laga wareejiyo imitixaanka waraaqda loona loona wareejiyo imtixaanka khadka onlaynka ah sanadka 2022

Tani waxay ka dhigan tahay in bishii Mey 2021 ardayda qaarkood waxey u fadhiisteen NAPLAN warqad, halka qaar kalena ay u fadhiisteen khadka onlaynka ah.

NAPLAN Online waxay bixisaa qiimeyn wanaagsan, natiijooyin sax ah oo aad ugu falgaleysa ardayda.

Sideen u akhriyaa reboodhka?

Calaamada Markab-gantaal-kasta hoostiisa, waxaa ku qoran bayaan qeexaya in ilmahaagu uu ku dhameystiray qiimeyn kasta onlaynka ama warqada. Dhammaan ardayda Sannadka 3 waxay ku dhammaystiraan imtixaanka qoraalka warqad.

Iyadoo aan loo eegin inay ardaydu imtixaanka ku dhammaystiraan onlaynka ama warqadda:

- ardayda waxaa lagu qiimeeyaa isla aasaaska xirfadaha akhris, qorista iyo xisaabta ee lagu barto manhajka asaaska ah
- Natiijooyinka ardayga ayaa lagu sii wadi doonaa in lagu qiyaaso isla qiyaasta NAPLAN qiimeynta, macnaha natiijooyinka labada noocba waa la isbarbar dhigi karaa.

NAPLAN waa aalad qiimo leh oo ku siin karta aragtiyo waxtar leh ardayga heerkiisa waqtiga, laakiin riboodhka shaqsiyeed waa in loo tarjumaa si taxaddar leh maadaama ay ka tarjumayaan heerka ardayga maalinta imtixaanka.

Kaliya lixda koox (Band) ee ugu khuseeya heer sanad kasta ayaa lagu muujiyaa warbixinta ardayga. Warbixinta Sannadka 3aad waxay muujineysaa kooxaha 1-6 (Band 1-6), warbixinta Sannadka 5aad waxay muujineysaa kooxaha 3-8 (Band 3-8), Sannadka 7 warbixin ayaa muujineysa kooxaha 4-9 (Band 4-9), iyo warbixinta Sannadka 9 waxay muujineysaa kooxo 5-10 (Band 5-10). Jaantusyada ku jira riboodhka ardayga waxay muujinayaan kala duwanaanta boqolkiiba 60 boqolkiiba ardayda, celceliska natiijada qaranka iyo heerka ugu hooseeya ee heer qaran sanad kasta. Warbixinnada gobollada iyo taritoriyada qaarkood waxay sidoo kale muujinayaan iskuulka iyo / ama celceliska gobolka. Riboodhka ayaa sidoo kale soo koobeya xirfadaha ay ardayda sida caadiga ah ku muujiyeen qiimeynta koox kasta (Band).

Sidee NAPLAN u caawisaa ilmahayga?

NAPLAN waxay ardayda siisaa fursad ay ku muujiyaan waxa ay ka barteen dhinacyada akhriska iyo qorista. Natiijooyinka ardayga ee shakhsiga ah waxay muujinayaan waalidiinta / daryeelayaasha sida ilmahoodu ugu sameeyay akhrinta, qorista, higgaadinta, naxwaha & hakadka, iyo imtixaanada xisaabta.

Heerka uu ilmahaaga helay ayaa la barbardhigaa kan guulaha dhammaan ardayda Australia ay heleen, ma'aha oo keliya heerka ay heleen asxaabtooda. Natiijooyinka NAPLAN waxay ka caawin kartaa waalidiinta iyo ardayda inay kala hadlaan heerka shaqsiyeed macallimiinta. Sababta oo ah NAPLAN waxay la socotaa heerka horumarka ilmahaaga ee Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad, waxay kaloo bixisaa macluumaad ujeeddo leh oo ku saabsan koritaanka hanashada ardayda ee akhriska iyo qorista.

Saamayn intee le'eg ayay natiijooyinka ku yeelan doonaan mustaqbalka ilmahayga?

Natiijooyinka NAPLAN waxay bixiyaan macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xirfadaha akhris, qorista iyo xisaabta ee ilmahaagu ku baranayo manhajkooda caadiga ah ee dugsiga. Natiijooyinku waxay dhammaystiraan qiimaynta kale ee ilmahaagu sameeyo dugsiga. Waxay ku siinayaan adiga iyo macallimiinta ilmahaaga fahamka heerka ilmahaaga iyo horumarka xilliga qiimeynta. Macluumaadka waxaa loo isticmaali karaa in lagu taageero ilmahaaga si uu u gaadho kartidooda buuxda.

Dugsiyada qaar ayaa laga yaabaa inay weydiistaan reboodhada NAPLAN, marka lagu daro warbixinnada dugsiga, iyada oo qayb ka ah hannaanka gelitaankooda. Qiimaynta NAPLAN looma qorsheynin inay ahaato imtixaanka gelitaanka dugsiga. Si kastaba ha noqotee, natiijooyinka ayaa laga yaabaa inay faa'iido u leeyihiin ku wargelinta dugsi cusub baahiyaha ardayga. Haddii aad wax walwal ah qabtid, ACARA waxay kugu dhiirigelineysaa inaad kala hadashid dugsiga.

Sidee NAPLAN u caawisaa dugsigayga?

NAPLAN waa qiimeynta kaliya ee qaran ee ay qataan caruurta Australiya. NAPLAN waxay caawisaa:

- macalimiinta inay sifiican u aqoonsadaan ardayda u baahan caqabado weyn ama taageero dheeri ah
- iskuulada si loo ogaado awoodaha iyo meelaha looga baahan yahay barnaamijyada waxbarista
- dugsiyadu inay dejiyaan yoolalka aqriska iyo qoraalka
- nidaamyada iskuulka si dib loogu eego barnaamijyada iyo taageerada la siiyo iskuulada
- bulshada si ay u arkaan celcelis ahaan natiijooyinka dugsiga ee websaadka My School.

NAPLAN sidoo kale waxay dhameystireysaa qiimeynta kale ee iskuulka waxayna siisaa xog qaran ahaan la barbardhigi karta si ay uga caawiso dowladaha inay qiimeeyaan sida barnaamijyada waxbarashadu u shaqeynayaan iyo in ardayda ay la kulmayaan heerarka muhiimka ah ee akhriska iyo qorista.

Yaa kale oo arki doona natiijooyinka?

Sannad kasta, maamulka imtixaanku wuxuu siiyaa dugsiyada natiijooyin dhammaan ardayda u fadhiisata NAPLAN. Dugsiyada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u isticmaalaan natiijooyinka si ay ugu wargeliyaan qorshahooda ku saabsan horumarinta dugsiga oo dhan. Warbixinta ardayga shaqsiyeed waa mid sir ah. Ma jiro qof ka baxsan maamulka imtixaanka deegaankaaga ama dugsigaaga oo arki doona reboodhka ilmahaaga.

Iskucelceliska natiijooyinka dugsiga ayaa si guud looga warbixiyaa websidka *My School* (www.myschool.edu.au). Websaydka waxaa lagu cusbooneysiiyaa natiijooyinka sanadkii hore rubuc-koobaad ee sannad kasta. *My School* wuxuu u oggol yahay bulshada inay eegaan dhinacyada astaamaha dugsi kasta, iyo sidoo kale si loo barbardhigo iskuulada u adeega kuwa lamid ah tirada ardayda. Natiijooyinka shaqsiyadeed ee ilmahaagu lagama heli karo *My School*.

Ka waran haddii natiijooyinka aaney ahayn waxa aan ilmaheyga iyo anigu aan filaynay?

Imtixaanada NAPLAN waxay qiimeeyaan horumarka barashada akhriska iyo xisaabta. Ardayda waxaa lasiiyaa tilmaam meesha ay natiijooyinkoodu yaalaan qiyaasta qiimeynta imtixaan kasta. In kasta oo natiijooyinka NAPLAN la isbarbar dhigi karo heer qaran oo u dhexeeya dhammaan ardayda iyo waqti ka dib, khibradda ardayga ee maalinta imtixaanka ayaa laga yaabaa inay saameyn ku yeelato heerka ay helaan.

Haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah ka qabtid natiijooyinka NAPLAN ee ilmahaaga, waa inaad kuwaan kala hadashaa macallinka ilmahaaga, kaasoo kula yeelan doona fikradda ugu wanaagsan ee horumarka waxbarashada ee ilmahaaga.

Si aad wax badan uga ogaatid NAPLAN iyo / ama u dhaqaaqista khadka tooska ah, booqo www.nap.edu.au